WARBIXIN KU SAABSAN XARUNTA KAANADA EE MAXKAMADDA CAALAMKA

▶ WAA MAXAY CCIJ?

Xarunta Kaanada ee Maxkamadda Caalamka waa hay'ad heer qaran oo ay hawshoodu tahay samafalka iyo xuquuqul insaanka xaruntooduna ay ku taal magaalada Ottawa. CCIJ waxay la shaqeeyaan dadka ka badbaaday xasuuqa, ciqaabta iyo dhibaatooyinka si ay u raadiyaan caddaalad iyo in dadkii xadgudubka kula kacay loo saariyo mas'uuliyadda dembiyada ay geysteen. Waxaannu nahay hay'ad madax bannaan, oo ka tirsan kooxaha aan faa'ido doonka ahayn mana jirto xiriir aan la leenahay dawladda Kaanada.

▶ YAA KA FAA'IDEYSAN KARA ADEEGYADA AY QABTAA CCIJ?

Macaamiisha CCIJ waa dadka ka badbaado arrimaha ku xadgudubka xuquuqul insaanka ama dadka xiriir soke la leh dhibaaneyaasha ku geeriyooday ku xadgudubyadii arrimaha xuquuqul insaanka ama kuwa aan awoodin in ay inala soo xiriiraan.

▶ MAXAY QABTAAN CCIJ?

CCIJ waa xarunta khayraadka ay u macaamiishayada ka heli karaan macluumaadka ku saabsan fursadaha ay ku gaari karaan caddaaladda iyo meesha ay ka heli karaan qiimeynta ku saabsan waddooyinka ay faa'idada ugu jirto ee u furan. Sidoo kale waxaannu isku hawlineynaa in dadka xadgudubka geysta loo saariyo mas'uuliyadda falalka dembiyada ay ku kacaan. CCIJ waxay helaan macluumaadka ku saabsan qofka ku kacay falalka ku xadgudubka xuquuqul insaanka ee ku nool ama booqanaya dalka Kaanada ama ka tirsan shirkad ama koox halkaan ka ganacsata, kaddibna waxaannu billaabi karnaa hawlo baaritaan la xiriira. Caadi ahaan, habka caddaaladda ee ay macaamiisha ka helaan waa kiiska dacwadda sharciga ee lagu qaado qofka lagu eedeynayo in uu xadgudubka ku kacay. Marka ay CCIJ sameyso baaritaan hore kaddib, haddii uu macaamilka doonayo in uu sii dabagalo kiiska ama uu qaato tallaabo kale, waxay CCIJ tixraac ugu dirayaan macaamilka qofka ama xafiiska ku habboon si hawsha halkaasi looga sii wado. CCIJ lagama helo adeegga wakiilka sharciga balse waxay dabajoogayaan kiis kasta waxayna macaamilka caawinayaan illaa ay hawsha ka dhammaato.

▶ WAA MAXAY NOOCYADA NIDAAMKA CADDAALADDA UU MACAAMILKA DABAGELI KARO?

Waxay CCIJ ka caawini karaan macaamiisha dagabalka noocyada soo socda ee hababka caddaaladda:

NIDAAMKA DEMBI KU OOGIDDA EE GUDAHA DALKA KAANADA IYO DIBEDDABA CCIJ waxay sameeyaan baaritaannada loo gudbin karo dawladda Kaanada, dawladaha shisheeye ama maxkamadaha caalamka si dacwad loogu soo oogo shakhsiyaadka ku xadgudubka xuquuqul insaanka. Haddii baaritaan uu soo saaro caddeymo ku filan islamarkaana uu macaamilka doonayo in la sii wado nidaamka dacwad ku oogidda, waxaannu markaasi la xiriiri doonaa saraakiisha ku habboon. Haddii dawladda ama maxkamadda ay muujiyaan in ay dhab ka tahay in ay sii socoto nidaamka dacwad ku oogidda, CCIJ waxay isku xiraysaa macaamilka iyo saraakiisha waxayna islamarkaasi gudbinayaan caddeymihii ay soo uruuriyeen. Marka kiiska loo gudbiyo dawladda ama maxkamadda, waxaannu sii wadi doonaa in aannu xaqiijinno in nidaamka dacwadda ay u socoto hab waxtar leh oo caddaalad ku dhisan iyadoo markii loo baahdo aan talooyin siinayno xeer ilaaliyeyaasha.

DACWADAHA RAYIDKA EE GUDAHA KAANADA Waxay CCIJ sameeyaan baaritaanada keeni kara in la gudbiyo dacwadaha magdhaw loogu doonayo macaamiisha. Haddii uu baaritaan soo saaro caddeymo ku filan islamarkaana uu macaamilka doonayo in halkaasi laga sii wado nidaamka dacwadaha rayidka, waxaannu macaamilka ka caawini doonaa helitaanka qof qareen ah ee gudbiya oo kiiska dabagala iyadoo aan laga qaadan kharashyada sharciga.

MUSAAFURIN Waxay CCIJ taageeraan kiisaska shisheeye ama caalamiga ah ee la tixgelinayo rabitaanka macaamilka ama marka aysan suuragal ahayn in ay dawladda Kaanada maxkamad soo saarto. Waxay kaloo CCIJ taageeraan nidaamka dadka xadgudubka geysta lagu keeno Kaanada si maxkamad loo soo saaro haddii aysan dalalka kale dooneynin ama aanney wax ka qaban karin.

JINSIYAD KALA NOQOSHADA, MUSAAFURINTA IYO SAARITAANKA Waxay CCIJ taageeraan nidaamka lagu ciqaabo dadka ku xadgudba xuquuqul insaanka marka aysan jirin habab kale oo ka tirsan nidaamka maxkamadda/caddaaladda. CCIJ waxay ka soo horjeedaan musaafurinta ay ka imaan karto in lagu sii xadgudbo xuquuqul insaanka ama u suuragelinayso dadka xadgudubka geysta in ay ka baxsadaan nidaamka maxkamadda/caddaaladda.

MAGDHAWSIINTA MACAAMIISHA Waxay CCIJ ka caawisaa macaamiisha dabagalka magdhawga iyagoo u maraya nidaamka lagu taageero dhibbaneyaasha.

OLOLAHA WACYIGELINTA Waxay CCIJ qabtaan hawlo lagu wacyigeliyo shacabka si wax looga ogaado arrimaha ku saabsan in falalka dembiyada aysan ahayn kuwo ciqaab la'aan ah iyo joogitaanka ay Kaanada joogaan dad ku xadgudbay xuquuqul insaanka.

WAA MAXAY NOOCYADA DADKA KU XADGUDUBA XUQUUQUL INSAANKA EE AY CCIJ BAARAAN?

Badanaa baaritaanada CCIJ waxay ku saabsan yihiin shakhsiyaad lagu eedeeyay in ay geysteen falalka ku xadgudubka insaanka. Sidoo kale waxaannu baarnaa ku xadgudubka ay ku kacaan dawladaha shisheeye, dawladda Kaanada, shirkadaha iyo ururro kale, sida kuwa fallaagada ama kooxaha miliishiyada.

WAA MAXAY NOOCYADA KU XADGUDUBKA XUQUUQUL INSAANKA EE AY CCIJ BAARAAN?

Nasiib darro, CCIJ ma ay baaraan dhammaan noocyada kala duwan ee dembiyada. Waxaannu haysanaa ilo xad leh sidaa darteed waxaan awoodda saari karnaa arrimo yar. Ku xadgudubyada xuquuqul insaanka ee aannu baarno waa kuwa uu caalamka u tixgeliyo in ay ka mid yihiin kuwa ugu xun. Waa kuwo ku kooban falalka la xiriira ciqaabta, oo ah falalka xun ee ay ku kacaan saraakiisha dawladda, caadi ahaan marka uu qof ku jiro xabsiga, iyo dilka ka baxsan nidaamka maxkamadda, oo ah dilka ay geystaan saraakiisha dawladda. Haddii uu qof ka badbaaday falalka ciqaabta ama dhibaatooyin aad u xun ee ay geysteen saraakiisha dawladda, waxaa suuragal ah in CCIJ ay qofkaasi caawiso. Haddii uu jiro qof qaraabo la ah qof ay dawlad dishay, koox fallaago ah ama miliishiyo, waxaa suuragal ah in CCIJ ay ka caawiso sidii loo billaabi lahaa nidaamka baaritaanka.

WAA MAXAY WAXA QOFKA LAGA DOONAYO SI UU KIISKA U BILLAABO?

Mas'uuliyadda saaran macaamilka waxay ku xiran tahay nooca kiiska ama tallaabada uu macaamilka doonayo in uu qaato. Kiisaska dhammaantooda, macaamilka waxaa laga doonayaa in uu CCIJ u keeno qaar ka mid ah macluumaadka khaaska ah iyo wixii faahfaahin ah ee ku saabsan qisada macaamilka. Waxaannu ogsoonahay dhibaatada ay keeni karto in laga hadlo dhacdooyinka xasaasiga ah sidaa darteed mas'uuliyadda ayaannu macaamilka ka qaadi doonaa. Sidoo kale waxaannu dooni lahayn, haddii ay suuragal tahay, in uu macaamilka inaga caawiyo aqoonsashada markhaatiga iyo wixii caddeymo ah. Waxay CCIJ qabaan qaanuunno adag oo lagu badbaadiyo macluumaadka gaarka ah. iskama soo bandhigno macluumaadka ku saabsan macaamilka, marqaatiga ama dadka kale ee lala xiriiro ama macluumaadka qarsoodiga ah ee ay soo gudbiyaan iyagoo aan raalli ka ahayn, inkastoo ay suuragal tahay in ay maxkamad inaga codsato in macluumaadka la soo bandhigo. Haddii uu macaamilka go'aansado in uu sii dabagalo dacwadda maxkamadda, dacwadaha rayidka ama kiis kale oo sharciyeed, sida ay u badan tahay waa in uu macaamilka uu marqaati ahaan u soo hor istaago maxkamadda ama garsooraha. Mararka qaarkooda waxaa suuragal noqonaysa in macluumaadka ku saabsan macaamiisha ay noqdaan kuwo qarsoodi ka ah shacabka hase ahaatee dembiilaha kiiska lagu xukumo wuxuu xaq u leeyahay in uu ogaado magacyada dadka ku marqaati fura.

LACAG MIYAA LA SIINAYAA MACAAMIISHA KIISKA KA QAYB QAATA?

Haddii uu macaamilka sii dabagalo dacwadaha rayidka ama maxkamad kale oo magdhaw lagu doonayo, waxaa jirta fursad uu macaamilka ku heli karo lacag balse aad ayeey u dhib badan tahay. Ma jirto wax xaqiijinayo in macaamilka uu magdhaw heli doono.

KESI INACHUKUA MUDA GANI?

Ku dhawaad kiis kasta oo sharciyeed wuxuu qaataa muddo dheer si go'aan looga gaaro. Baaritaanka hore ee CCIJ waxay qaadan kartaa dhowr bilood ama sanad. In kiis la soo gudbiyo waxay caadi ahaan qaadataa dhowr bilood oo dheeraad ah. Mar haddii kiiska la soo gudbiyo, muddada ay qaadanayso waxay ku xirnaan doontaa sida uu isu difaaco dembiilaha. Si kastaba, waxay u badan tahay in kiis kasta uu qaato ugu yaraan seddex ama afar sanadood waxayna badankooda qaataan muddo intaasi ka dheer. Waxay u badan tahay in macaamilka ay ka qaadato qiyaas ahaan 10 maalmood sanad kasta in la shaqeeyo CCIJ iyo qareennada, si uu halkaasi uga marqaati furo, iyo in uu tago maxkamadda iyo in uu qabto hawlo kale oo la xiriira kiiska. Tallaabooyinka kale oo aan la xiriirin kiisaska sharciga ah waxay qaadan karaan muddo ka yar.

MIYAA LAGA DOONAYAA MACAAMILKA IN UU BIXIYO LACAGTA BAARITAANKA AMA SI UU KIIS SHARCIYEED U BILLAABO?

Maya. CCIJ ama qareennada ama saraakiisha kale waxay bixin karaan kharashyada la xiriira baaritaanka ama kiiska.

Si aad ula hadasho CCIJ, waxaad fadlan la xiriirtaa Iskuduwaha Sharciga, Matt Eisenbrandt:

Taleefoon ahaan: (613) 744-7667 furaha. 266
Email ahaan: meisenbrandt@ccij.ca
Boosto ahaan: 312 Laurier Avenue East
Ottawa, Ontario K1N 1H9

Dobrotvorni broj:
86575 9088 RR 0001

Produced with support from the Law Foundation of Ontario